JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند


| | | |
|---|---|---|
| *Sannadka 13aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 29/06/2023* |


# XEERKA CIIDANKA DAB-DEMISKA IYO SAMATABIXINTA
# XEER LR.106/2023


Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com


*Lama iibin karo*
*Not for sale*

*Sannadka 2024*

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/WM/222-1305/062024** **Taar: 12/06/2024**

# Wareegto Madaxweyne

## Dhaqan-galka Xeerka Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta, Xeer Lr. 106/2023

**Markaan Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Go'aanka Golaha Wakiillada ee Go'aan Lr. GW/KF-8/10/2024 ee summadiisuna tahay GW/G/10/146/2024, kuna taariikhaysan 27/05/2024, ujeeddadiisuna tahay soo gudbinta go'aanka ansixinta Xeerka Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta, Xeer Lr. 106/2023;

**Markaan Arkay:** Qodobbada 75aad iyo 76aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Waxaan soo saaray;**

Wareegtadan oo lagu baahinayo Dhaqan-galka Xeerka Ciidanka Dab-demiska iyo Samata-bixinta ee Xeer Lr. 106/2023.

Allaa Mahad Leh

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**Jamhuuriyadda Somaliland**
Golaha Wakiilladda

**The Republic of Somaliland**
House of Representatives

**Xafiiska Guddoomiyaha - Office of the Speaker**
Mob: +252-513503 *(Hargeisa - Somaliland)* E-mail: speakersomalilandparliament@gmail.com

Ref: Gw/G/10/146/2024 Date: 27/05/2024

**Ku: Md. Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha JSL** **= Madaxtooyda=**

**UJEEDDO: Soo Gudbin Go'aanka Ansixinta Xeerka Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta Xeer Lr. 106/2023.**

*Mudane Madaxweyne,*

Waxaa aan si Sharaf iyo qadarin leh halkan kuugu soo gudbinaynaa Nuqulka Xeerka Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta **Xeer Lr. 106/2023**: -

1. Go'aanka Ansixinta Xeerka Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixinta **Xeer Lr. 163/2023 (Go'aan Lr. GW/KF-8/10/2024).**

**ALLAH MAHAD LEH**

**Yaasiin Xagi Maxamuud Xiir (Faratoon)**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL**

GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIIL... SPEAKER JAMHUURIYADDA SOMALILAND

RECEIVED 27 MAY 2024 BY: PRESIDENCY Reg No: 835

Ref: Gw/Ky-8/10/2024

Date: 27 / 05 / 2024

Ujeedo: - Go'aanka Ansixinta Xeerka Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta Xeer Lr. 106/2023

## GOLAHA WAKIILLADA JSL

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay:- | Qodobbada 38aad, 53aad, 76aad, 77aad iyo 78aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. |
| Markuu Arkay:- | Qodobka 12aad Faqradiisa 2aad, Qodobka 18aad Faqradiis 2aad, Qodobka 24aad iyo Qodobbada 26aad iyo Qodobka 34aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. |
| Markuu Tixgaliyay:- | In nafta aadamuhu ay tahay deeq Ilaahay, qofkastana uu xaq u leeyahay ilaailnta naftiisa, hantidiisa iyo deegaanka uu ku noolyahay, loona baahan yahay in laga hortago wax kasta oo dhibaato u keenaya sida dabka iyo wax ka qabashada dhibaatooyinka ka dhasha masiibooyinka kale ee dabiiciga ah. |
| Markuu Qiimeeyay:- | Badbaadada iyo samatabixinta shacabka ee khataraha iyo masiibadu waajahdo, dadka iyo duunyadaba, isla markaana muhiim tahay dhismaha iyo tababaridda Ciidan Dab-demis oo wax ka qaban kara masiibooyinkaas. |
| Markuu Tixgaliyay:- | Soo jeedinta Xukuumadda ee ah in la helo xeer maamul oo lagu aasaasayo Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta. |

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay:- | Go'aanka ansixinta Xeerka Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta **Lr. 106/2023. 106/2023** ee Golaha Wakiiladdu u gudbiyeen Golaha Guurtida JSL kuna taariikhsanayd **26/12/2023** kalfadhigii **7aad** fadhigiisi **2aad.** |
| Markuu Arkay:- | In Golaha Guurtidu wax-ka-bedel iyo kaabis ku sameeyeyey kuna ansixiyeen **(67)** cod xeerka **Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta Xeer Lr. 106/2023** |

# WUXUU

Cod aqlabiyad ah **(38 cod)** oo gacan taag ah ku ansixiyay Xeerka Ciidanka Deb-damiska iyo Samatabixinta Xeer **Lr. 106/2023**, halka shan **(5)** mudane ka diideen, **(2)** mudane ka aamuseen, Guddoomiyuhuna muu codayn sida caadada ah.

ALLAA MAHAD LEH

| | |
|---|---|
| **C/risaaq Siciid Ayaanle** | **Md. Yaasiin .X. Maxamuud Xiir (Faratoon)** |
| **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL** | **Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL** |

GOLAHA WAKIILADA
JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# GOLAHA WAKIILLADU

**Markuu Arkay: -** Qodobbada 38aad, 53aad, 76aad, 77aad iyo 78aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu Arkay: -** Qodobka 12aad Faqraddiisa 2aad, Qodobka 18aad Faqraddiisa 2aad, Qodobka 24aad, Qodobbada 26aad iyo Qodobka 34aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu Tixgeliyay: -** In nafta aadamuhu ay tahay deeq Ilaahay, qofkastaana uu xaq u leeyahay ilaailnta naftiisa, hantidiisa iyo deegaanka uu ku noolyahay, loona baahan yahay in laga hortago wax kasta oo dhibaato u keenaya, sida dabka iyo wax ka qabashada dhibaatooyinka ka dhasha masiibooyinka kale ee dabiiciga ah.

**Markuu Tixgeliyay: -** Soojeedinta xukuummadda ee ah in la helo xeer maamul oo lagu aasaasayo Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta.

**Markuu Qiimeeyay: -** Badbaadada iyo samatabixinta shacabka ee khataraha iyo masiibadu waajahdo dad iyo duunyadaba, isla markaana muhiim tahay dhismaha iyo tababaridda Ciidan Dab-demis oo wax ka qaban kara masiibooyinkaas.

**Markuu Dhegeystay:** Soojeedinta Gudidda Arrimaha Gudaha, Nabadgalyada iyo Difaaca u qaabilsan oo tallooyin iyo soo jeedimo wax ku ool ah Golaha ka siisay muhiimmadda iyo baahida xeerkan dalka iyo dadku u qabaan.

**Markuu arkay: -** Go'aanka wax-ka-beddelka iyo kaabista **Golaha Guurtidu** ku soo samaysay Xeerka Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta.

## Wuxuu Ansixiyay

## Xeerka Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta Somaliland

## Xeer Lr. 106/2023



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## QAYBTA KOOWAAD
## QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad
### Magaca Xeerka

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa "**Xeerka Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta Xeer Lr. 106/2023.**

### Qodobka 2aad
### Erey Bixin

**Adeeg:** Waxa loola jeedaa adeegyada kala duwan ee Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu bixiyo sida:

**B.** Ka Badbaadinta dabka nafta iyo hantida bulshada Jamhuuriyadda Somaliland.
**T.** Ilaalinta iyo xakameynta khasaaraha nafeed iyo hantiyeed ee uu dabku keeni karo.
**J.** Qabashada shaqo kasta oo la'xidhiidha waajibaadka Ciidanka Dab-demiska
**X.** Bakhtiinta dabka iyo ka hortagga faafiddiisa.

**Gurmadka masiibooyinka dabiiciga ah:** waxa loola jeedaa daadadka, dabeylaha, duufaannada, dhulgariirka IWM.

**Agab**: Waxa loola jeedaa wax alla wixii agab ama qalab ah ee loo istimaalo sidii loogu qaban lahaa waajibaadka & masuuliyadda Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta.

**Ciidan:** Waxa loola jeedaa Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta.

**Dab:** Waxa loola jeedaa dab kasta oo gaysan kara khasaare nafeed iyo hantiyeeba si' kasta haku yimaaddee.

**Degmo:** Waxa loola jeedaa degmooyinka kala duwan ee uu ka hawl galo Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu.

**Gurmadka degdegga ah:** Waxa loola jeedaa gurmadka degdegga ah ee lagaga hortagayo khasaaraha nolosha iyo maalka ee uu sababo masiibada dabka ama aafooyinka kale ee dabiiciga ah.

**Wasaarad:** Waxa loola jeedaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Jamhuuriyadda Somaliland.

**Wasiir:** Waxa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee JSL.

**Rugta Masiibo Qaran**: Waxa loola jeedaa meel laga hoggaamiyo oo lagala socdo marka ay masiibo dhacdo.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 3aad

## Ujeeddooyinka Xeerka

Ujeeddooyinka Xeerka waxa ka mid ah:

1) In la'dejiyo xeer maamul oo Lagu aasaasayo Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta.

2) In la'helo xeer u gaar ah oo uu yeesho Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta Qaranku, xeerkaas oo qeexaya shaqooyinka iyo waajibaadka ciidanka ee la'xidhiidha ka hortagga iyo xakameynta dabka iyo wax ka qabashada dhibaatooyinka ka dhasha masiibooyinka kale ee dabiiciga ah.

3) In la'helo xeer si' cad u qeexaya qaab-dhismeedka Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta, kaas oo leh xarumihiisa iyo qalabkiisa, si' kor loogu qaado tayada adeegyada ay Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu u qabtaan bulshada, si' looga badbaadiyo nolosha iyo hantida bulshada Jamhuuriyadda Somaliland aafada dabka iyo masiibooyinka kale ee dabiiciga ah.

## Qodobka 4aad

## Xadka Dabbaqaadda Xeerkan

Xeerkan Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta waxa lagu dabbaqayaa dhismaha iyo maamulka Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta iyo hawl-gallada ciidanka ee la'xidhiidha ka hortagga iyo xakameynta dabka iyo wax ka qabashada dhibaatooyinka ka dhasha masiibooyinka kale ee dabiiciga ah ama dad sameega ah.

## Qodobka 5aad

## Mabaadii'da Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta

Si'waafaqsan qodobbada xeerkan lagu aasaasay Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta mabaadii'da Ciidanka hagaysaa waa:

1. Ilaalinta iyo raacitaanka Dastuurka iyo xeerarka dalka u yaal oo ay ka mid yihiin xuquuqaha iyo xorriyaadka aasaasiga ah ee qofka.
2. Badbaadada iyo samatabixinta shacabka ee khataraha iyo masiibadu waajahdo, dad iyo duunyadaba.
3. U dhaqmidda hal-beegga xirfadnimo ee ugu sarreeya iyo edebta ugu sarraysa ee looga baahan yahay ciidanka.

## Qodobka 6aad

## Shakhsiyadda Qanuuniga ah ee Ciidanka Dab-demiska

1. Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu waa ciidan leh jiritaan xeereed, waxay yeelan karaan hanti ma'guurto ah iyo mid guurto ahba si'waafaqsan xeerka, waa la dacwayn karaa, waxna way dacwayn karaan.
2. Dacwadaha madaniga ah iyo dacwadaha maamul waxa ciidanka ka kaalmaynaya Xafiiska Garyaqaanka Guud ee dawladda.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## QAYBTA LABAAD

## CIIDANKA DAB-DEMISKA IYO SAMATABIXINTA QARANKA

### Qodobka 7aad

### Aasaaska Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta Qaranka

1) Xeerkan waxa lagu aasaasay Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta oo yeelanaya jiritaan qaanuuni ah, astaan iyo shaambad u gaar ah, kuwaas oo hoostagaya Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee JSL.

2) Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu si uu u guto waajibadkiisa, waxa uu yeelan karaa hanti guurto iyo maguurto ah, waxana uu ku geli karaa magaciisa heshiis kasta, kuna dacwayn karaa ama lagu dacwayn karaa.

3) Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu waxa uu u madaxbannaan yahay gudashada xilkiisa iyo waajibaadkiisa, si' waafaqsan Dastuurka Somaliland, xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka.

4) Xarunta Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu waxa ay noqonaysaa Caasimadda Jamhuuriyadda Somaliland ee Hargeysa, waxa kale oo uu xarumo ku yeelanayaa Gobollada iyo Degmooyinka Dalka JSL.

5) Xubnaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta waxa loo dhaarinayaa si'waafaqsan Qodobka 129aad ee Dastuurka JSL.

### Qodobka 8aad

### Astaanta, Direyska, Derajada & Gaadiidka Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta

1) Astaanta Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu waxa ay noqonaysaa xiddig siddeed gees leh oo badhtamaha ku leh dab la'daminayo kuna wareegsan tahay calaamad leh midabbada calanka Jamhuuriyadda Somaliland.
2) Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu waxa ay yeelanayaan direys u gaar ah oo midabkiisu yahay casaan.

3) Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu waxa uu yeelanayaa nidaam derajo Ciidan iyo kala sarreyn maamul, waxaanu xagga derajada kala mid noqonayaa Ciidanka Booliska Jamhuuriyadda Somaliland.

4) Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu waxa uu yeelanayaa gaadiid u gaar ah oo leh midab casaan ah iyo summad (plate number) u gaar ah oo ay ku qoran tahay Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta Qaranka oo la soo gaabiyay.

### Qodobka 9aad

### Qaab-dhismeedka Ciidanka Dab-demiska

1) Taliska Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu waxa uu yeelanayaa Qaab-dhismeed ka kooban:



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

B) Taliye.
T) Taliye ku-xigeen.
J) Hoggaanno.
X) Talisyada Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta ee gobollada iyo degmooyinka dalka.

kh) Xarumo tababar.

D) Unug qaabilsan caafimaadka.

2) Shaqooyinka waaxyaha kala duwan ee Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta waxa nidaamin doona Xeer-nidaamiye xeerkan waafaqsan.

Tirada hogaannada ciidanka waxa kordhin kara/dhimi kara Taliyaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta.

## QAYBTA SADDEXAAD

## WAAJIBAADKA GUUD EE CIIDANKA DAB-DEMISKA

### Qodobka 10aad

### Xilka iyo Waajibaadka Ciidanka Dab-demiska

Xilka iyo Waajibaadka Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta waxa ka mid ah;

1) Ka hortagga, maareynta iyo xakameynta aafada dabka, si looga badbaadiyo nafaha iyo hantida muwaaddiniinta dhibaatooyinka uu u keeno dabku.
2) Ka qaybgalka hawl-gallada gurmadka ah ee lagaga badbaadinayo nafaha iyo hantida muwaaddiniinta dhibaatooyinka ay keenaan masiibooyinka kale ee dabiiciga ah.
3) Dejinta qorsheyaasha iyo cilmibaadhista lagu horumarinayo hababka xakameynta dabka iyo masiibooyinka kale ee dabiiciga ah, iyada oo laga eegayo horumarka dhinaca warshadaha, qalabka iyo dhismeyaasha.
4) Degdeg uga jawaabidda marka ay dhacaan aafada dabka iyo masiibooyinka kale ee dabiiciga ah, si' looga badbaadiyo nolosha iyo hantida, isla markaana loo yareeyo khasaaraha nololeed iyo hantiyeed ee ay gaysan karaan masiibooyinkaasi.
5) Ku soo rogidda goobaha ganacsiga in la dhigo qalabka dab-demiska, kuna kormeeraan fulintooda.

6) Baadhidda iyo kormeerka dhismeyaasha iyo goobaha ganacsiga si' loo xaqiijiyo in goobahaasi ay leeyihiin qalabka ka hortagga iyo xakameynta dabka, si' looga hortago waxyeelada dabka.
7) Baadhidda sababaha dhaliya dabka iyo u gudbinta Xeer-ilaalinta, haddii sababaha dhaliyay dabku ay keenayso fal-dambiyeed.
8) Ka hirgelinta xarumo dab-demis magaalooyinka iyo degmooyinka dalka.
9) Fulinta barnaamijyada wacyigelinta bulshada ee la'xidhiidha sababaha dhaliya dabka iyo farsamooyinka looga hortago, si' loo xaqiijiyo badbaadada bulshada loona yareeyo khasaaraha ka dhasha dabka iyo masiibooyinka kale ee dabiiciga ah.



FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL

10) Ururinta iyo tirakoobka dhacdooyinka dabka, si' loo ogaado waxyaabaha keena loona sameeyo qorshaha ka hortagga khasaaraha uu keeno dabku.
11) Hirgelinta wacyi gelin iyo kor u qaadid la'xidhiidha aqoonta ka hortagga dabka, gaar ahaan xarumaha waxbarashada, ganacsiga iyo warshadaha, lana dhigo qalabka Dab-deminta intii suuragal ah.
12) Tababarka iyo kor u qaadidda xirfadda Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta Qaranka.
13) Degdeg uga jawaabidda dhammaan adeegyada ciidanka iyada oo lagu fulinaayo qalab ku habboon iyo hawl-wadeenno leh xirfadda dab-demiska.
14) Xaqiijinta in qalabka iyo xubnaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu ay heegan yihiin xilli walba, si ay uga bixiyaan jawaab celin degdeg ah yeedhmada bulshada ee dabka iyo masiibooyinka kale ee dabiiciga ah.
15) Fulinta xilalka iyo waajibaadyada kale ee ay siiyaan xeerkan iyo xeerarka kale ee dalku.

## Qodobka 11aad

## Awoodda Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta

Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu marka ay shaqadooda gudanayaan waxa ay awood u leeyihiin:

1) In ay galaan dhisme kasta iyaga oo aan ogolaansho uga baahan mulkiilaha ama cidda ku jirta, hadii ay jirto khatar dab ama masiibo dabiiciya, si looga badbaadiyo nafaha iyo hantida shacabka iyo deegaankaba.
2) Xilliyada uu dab kaco ama masiibo kale oo dabeeci ahi ay jirto waxa ay joojin karaan gaadiidka dadweynaha iyo ka dawladaba, sidoo kalena xidhi karaan waddooyinka iyaga oo aan u baahan Ciidanka Nabad-gelyada Waddooyinka, si' loo xakameeyo waxyeellada dabka iyo masiibooyinka kale ee dabiiciga ah.
3) Waxa ay xidhi karaan qayb ama dhammaan jidadka, waxaanay ku xidhi karaan xadhkaha iyo calaamadaha waddo xidhista loo isticmaalo (Hazard Tapes/Hazard Lights) ama gaadiidkoodaba.
4) Waxa ay jari karaan xadhkaha dabka korontada iyo waxyaabaha kale ee dabka faafiddiisa ka qayb qaadan kara, iyaga oo aan ogolaansho uga baahan mulkiilayaashooda.
5) Wakaaladaha biyuhu waa in ay biyaha u soo duwaan aagga dabku uu ka dhacay, si loo helo biyo ku filan la'dagaalanka dabka.
6) Waxa ay isticmaali karaan booyadaha biyaha ee dawladda iyo kuwa shacabkaba, haddii ay lagama maarmaan u tahay hawl-galkooda iyaga oo aan ka bixinayn wax magdhaw ah biyahaas.
7) Waxa ay hubin karaaan, baadhi karaan dhismeyaasha cusub ee loogu talo galay ganacsiga iyo warshadaha, si' loo hubiyo in loo dhammaystiray qalabkii loogu talo galay badbaadada iyo xakameynta dabka, (fire and safety standards), si'waafaqsan Xeerka Dhismeyaasha iyo Xeerka Maamulka Magaalooyinka Xeer L/r 17/2008, haddii aanu dhismuhu lahayn hab-raacyadii ay u dejiyeen Wasaaradda Hawlaha Guud iyo



FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE

dawladaha hoose ee magalooyinku, waxa ay u soo jeedinayaan hay'adaha ay khuseeyaan in ay xayiraan dhismehaas.

8) Waxa ay adeegsan karaan baabuurta dadweynaha iyo kuwa dawladda, haddii ay lagama maarmaan u tahay badbaadinta nafaha iyo hantida shacabka Somaliland.
9) Waxa ay ka kaxayn karaan dadweynaha goobaha ay gurmadka ka wadaan, sidoo kale waxa ay ka mamnuuci karaan dadweynaha in ay soo galaan goobaha dabku ka dhacay si' aanay uga soo gaadhin khasaare nafeed.
10) Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta laguma yeelanayo kharash ku saabsan isticaamlka biyaha gurmadka ay ku galaan ama ay shaqo dheeriya ku qabtaan ee wakaaladaha biyaha.
11) Waxa ay gurmad weydiisan karaan ciidanka booliska iyo ciidamada kale ee Qaranka, ina ay ku gacan siiyaan hawl-gallada lagu xakameynaayo dabka iyo dhibaatooyinka kale ee dabiiciga ah.
12) Waxa ay qaadi karaan tallaabo kasta oo lagama maarmaan ah oo ujeeddadeedu tahay in laga hortago ama la'yareeyo khasaare nafeed iyo hantiyeed, haddii uu **jiro** dab ama qarka u saaran yahay in uu kaco ama haddii uu qof ku xayirmo gaadiid ama dhisme dhexdii.

## QAYBTA AFRAAD

## MAAMULKA

### Qodobka 12aad

### Masuuliyadda iyo Waajibaadka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixinta Qaranka waxa uu hoos imanayaa Wasaarada Arimaha Gudaha oo ku yeelanaysa masuuliyadahan hoos ku xusan:

1) Dejinta qorshayaasha iyo siyaasadaha xakamaynta iyo ka hortagga masiibooyinka dabka ka dhasha **iyo kuwa dabiiciga ah.**
2) Kala talinta Madaxweynaha magacaabista iyo xil-kaqaadista Taliyaha Ciidanka Dab-demiska
3) Isku xidhka Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta iyo hay'adaha kale ee qaranka.
4) Ka hawl-gelidda in Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta helo qalabka iyo agabka dab-damiska noocyadiisa kala duwan.
5) Ka hawl-galidda in Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu helo dhaqaale ku filan, si uu u guto waajibaadkiisa.
6) Horumarinta iyo kobcinta aqoonta iyo xirfadaha Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixinta.
7) Kormeeridda iyo La'socodka in Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixintu u gutay waajibaadkiisa shaqo, si'waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee Dalka.
8) U gudbinta Golaha Wasiirada warbixinaha waxqabadka iyo hawl-gallada Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixinta.
9) Soo saaridda wareegtooyin iyo Xeer-nidaamiyayaasha lagama maarmaanka u ah dhaqan galinta xeerkan.

10) Kala talinta Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixinta tallaabooyinka ku aaddan fulinta waajibaadyada iyo shaqooyinka ciidanka.
11) Fulinta awoodaha kale ee ku xusan xeerarka dalka, si'waafaqsan xadka shaqo ee ciidankan.
12) Waa in Wasaaradda Arrimaha Guduhu samaysaa maamul daadejin Dawladaha Hoose ee dalka, hadba inta ay hanan karaan.

## Qodobka 13aad
## Shuruudaha Magacabista Taliyaha Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixinta

Qofka loo magacaabayo Taliyaha Ciidanka Dab-damiska iyo samatabixintu waa in uu leeyahay sifooyinkan:

1. Madaxweynaha ayaa magacaabaya xilkana ka qaadaya Taliyaha Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixinta, marka uu la tashado Wasiirka Arrimaha Gudaha.
2. Waa in uu noqdaa qof muslim ah kuna dhaqma diinta Islaamka.
3. Waa in aan da'diisu ka yaraan 40 sanno.
4. Waa in uu noqdaa muwaadin dhalad ah (By Birth).
5. Waa in uu aqoon gaar ah u leeyahay cilmiga dab-demiska oo uu haysto shahaado la'aqoonsan yahay.
6. Waa in uu leeyahay waaya'aragnimo dab-demis oo aan ka yarayn 5 sanno.
7. Waa in aanu xukun ciqaabeed ku dhicin 5tii sanno ee ugu dambeeyay.
8. Waa in uu yahay qof ku sifoobay akhlaaq wanaag, ammaano iyo daacadnimo.
9. Marka uu Madaxweynuhu magacaabo Taliyaha Ciidanka, waxa lagu dhaarinayaa dhaarta dastuuriga ah ee ku xusan qodobka 129aad ee Dastuurka.

## Qodobka 14aad

## Shuruudaha Magacaabista Taliye ku-xigeenka Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta

Qofka loo magacaabayo Taliye ku-xigeenka Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu, waa in uu leeyahay aqoonta iyo waayo'aragnimadan hoos ku xusan:

1) Madaxweynaha ayaa magacaabaya Taliye ku-xigeenka Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta, isagaana xilka ka qaadi kara.
2) Waa in uu yahay muwaadin u dhashay dalka JSL (By Birth)
3) Waa in uu yahay muslim kuna dhaqmo diinta Islaamka.
4) Waa in uu leeyahay aqoon jaamacadeed, haystana shahaadada 1aad ee cilmiga dab-demiska (Preliminary Certificate of Institution of Fire Engineers) ama khibrad shaqo oo u dhiganta oo uu u leeyahay hawlaha dab-damiska.
5) Waa in uu leeyahay waaya'aragnimo shaqo oo la'xidhiidha shaqooyinka dab-demiska iyo maamulka arrimaha ciidamada dab-demiska iyo samatabixinta ama sharciga ugu yaraan shan (5) sanno.
6) Waa in aanu ku dhicin xukun-ciqaabeed oo kama danbeys ahi shantii sanno ee u danbeeyay.
7) Waa in uu yahay xilkas, akhlaaqdiisa iyo dhaqankiisuba toosan yihiin.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · SOLICITOR GENERAL OFFICE · OFFICIAL GAZETTE

## Qodobka 15aad

## Xilka iyo Waajibaadka Taliyaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta

Xilka iyo Waajibaadka Taliyaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta waxa ka mid ah:

1) Waa Masuulka ugu sarreeya ee Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixinta.
2) Dejinta tabaha (strategy) ama hababka lagu horumarinaayo Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta si' looga hortago, loona yareeyo dhibaatada dabka ee soo gaadhi kara nolosha iyo hantida bulshada.
3) Maamulka iyo isku xidhka hawlaha shaqo iyo hawl-galinta Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta.
4) Xaqiijinta in ciidanka dabdamisku degdeg uga jawaabaan dhacdooyinka dabka iyo masiibooyinka kale ee dabiiciga ah.
5) Diyaarinta qorsheyaasha iyo manaahijta tababarrada Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta.
6) Abuuridda xarumaha tababarrada Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixinta, xaqiijinta in ay ciidanku helaan tababarrada lagama maarmaanka u ah xil-gudashadooda, isaga oo la'kaashanaya hay'adaha kale ee wada shaqayntu ka dhaxayso.
7) Hirgelinta hoosada dayactirka gaadiidka iyo qalabka dab-demiska.
8) Xaqiijinta in laga hirgeliyo xarumaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta gobollada iyo degmooyinka dalka.
9) Dejinta habraaca qorista iyo shaqaalaynta xubnaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta.
10) Kormeerka iyo dabagalka shaqooyinka waaxaha iyo xarumaha kale ee Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta Qaranka.
11) Hubinta in dhammaan talaabooyinka la qaaday waafaqsanyihiin sharciga iyo xeerarka dab-demiska.
12) Diyaarinta iyo isku dubaridka warbixinaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta Qaranka.
13) Qorsheynta miisaaniyadda Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta, hubinta isticmaalka kharashaadka miisaaniyadda, in loo isticmaalay si' qorshaha waafaqsan.
14) Hoggaaminta barnaamijyada tababarrada iyo wacyigalinta, kuwaas oo ku saabsan ka hortagga dabka iyo masiibooyinka kale ee dabiiciga ah.
15) Taliyaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu waxa uu warbixinaha la'socodsiinayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Madaxweynaha Qaranka.

## Qodobka 16aad

## Xilka iyo Waajibaadka Taliye ku-xigeenka Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixinta

Xilka iyo Waajibaadka Taliye ku-xigeenka Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu waa:

1) In uu noqdo Kusimaha Taliyaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta, marka uu Taliyuhu maqan yahay ama uu xanuunsado.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

2) In uu fuliyo waajibaadka iyo masuuliyadaha kale ee uu u igmado Taliyaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu.
3) In uu kala taliyo Taliyaha Ciidanka hawlaha la'xidhiidha waajibaadkiisa shaqo ee uu Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixinta u hayo.

### Qodobka 17aad

### Xilka iyo Waajibaadka Hoggaannada

Xilka iyo Waajibaadka hogaannada Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixintu waa: -

1. Fulinta Tabaha (strategies) lagu horumarinaayo Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixinta ee degmooyinka.
2. Maamulka iyo isku dubaridka hawlaha shaqo iyo hawl-galinta Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixinta ee heer degmo.
3. Diyaarinta sidii Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixinta degmo uu si'degdeg ah ugaga jawaabi lahaa dabka iyo masiibooyinka kale ee yimaadda.
4. Ilaalinta iyo dayactirka gaadiidka iyo qalabka kala duwan ee Ciidanka Dab-debmiska iyo Samatabixinta degmada.
5. U soo gudbinta Taliyaha qorshaha miisaaniyadda iyo sidoo kale xisaab-xidhka miisaaniyadda la'isticmaalay.
6. Iyo u soo gudbinta Taliyaha warbixinnada iyo macluumaadka kale ee la'xidhiidha degmada uu maamulo.

## QAYBTA 5AAD
## SHAQO-QORISTA XUQUUQAHA IYO DARYEELKA CIIDANKA.

### Qodobka 18aad
### Habka shaqo Qorista

Taliska Ciidanka Dab-damiska ayaa awood u leh habka shaqo qorista xubnaha Ciidanka Dab-damiska iyo samatabixinta waxaana lagu soo saari doonaa hage maamul. Waxase shardi ah in Taliska Ciidanka Dab-damiska iyo samatabixintu sameeyaan:

b) in la'xayaysiiyo bil ka hor in Ciidanka Dab-demisku u baahan yahay ciidan.

t) in la'qaado imtixaanka hore ee qaadashada xubnaha Ciidanka Dab-demiska.

j) Waxa waajib ah ciidanka loo qaadanayo dab-damisku in ay ka koobnaadaan deegaannada dalka oo dhan.

### Qodobka 19aad

### Shuruudaha Shaqo Qorista Xubnaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta

Ciidanka loo xulayo in ay ka mid noqdaan Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta waxa looga baahan yahay in ay buuxiyaan shuruudahan soo socda: -

1) Waa in uu/in ay yahay/tahay muwaaddin dhalad ah (By Birth)

2) Waa in aan da'diisu/ da'deedu ka yaraan 18 sanno jir.
3) Waa in uu/in ay haysto/haysato shahaado dugsi sare ama wax u dhigma.
4) In aanu ku dhicin xukun ciqaab ah oo kama danbays ahi shantii sanno ee u danbeeyay.
5) In miisaanka culeyska jidhkiisu/jidhkeedu ka yaraanin 70 KG
6) In u dhererkiisu noqdo 1.75m iyo in ka badan.
7) Waa in uu caafimaad ahaan iyo jidh ahaanba u bed-qabo.
8) In uu buuxiyo shuruudaha kale ee ku xusan hab-raaca qorista xubnaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta oo lagu soo saari doono Xeer-nidaamiye faahfaahinaya.

## Qodobka 20aad

## Diwaanka Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta

1) Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu waxa uu yeelanayaa diiwaan guud oo lagu keydiyo dhammaan macluumaadka xubnaha Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixinta ee kala duwan.
2) Iyada oo aan waxba loo dhimayn diiwaanka guud ee ku xusan faqradda 1aad ee sare, xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu waxa uu yeelanayaa fayl u gaar ah, kaas oo lagu keydiyo macluumadkiisa iyo shaqooyinkiisa ay ka midka yihiin kuwan hoos ku xusan:
   b) Magaca Askariga oo afaran.
   t) Wakhtiga shaqada la'qoray iyo da'diisa
   J) Miisaankiisa.
   x) Nooca shaqada uu ugu xilsaaran yahay ciidanka.
   kh) Goobta ama xarunta uu ka hawl-galo.
   d) Xilka, haddii xil loo magacaabo.
   r) Aqoon korodhsiyo iyo tababarrada uu qaatay.
   s) Abaal-marinaha uu helay.
   sh) Dallacaadaha, ama derejo dhimista.
   dh) Anshax marinaha.
   c) Fasaxyada iyo dhacdo kasta oo kale oo ay tahay in la kaydiyo.
   g) Iyo xaaladdiisa caafimaad.
3) Ciidanka Dab-demisku waa in uu xaqiijiyaa in xogtani sax tahay, ka ilaashan tahay lumitaan ama ay isticmaali karaan ciddii loo igmaday/ogolaaday ujeeddo ku aaddan in ay ku maamulaan xubnaha ciidanka (Confidentiality).
4) Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta ayaa ka masuul ah xogta xarunta, waxaanay la'wadaagi karaan guddiyada labada Gole Qaran (Guurtidda & Wakiilada) ee ku shaqada leh.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL

## Qodobka 21aad

## Xuquuqaha Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixinta

Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixintu waxa uu Qaranka ku yeelanayaa xuquuqaha hoos ku xusan:

1. Xubin kasta oo ciidanka ah oo gudanaya waajibaadkooda ciidannimo waa in ay helaan mushahar ku filan oo ka kooban mushahar joogto ah, mushahar derajo iyo gunnooyin-xileed/takhasus loo asteeyay/qoondeeyay.
2. Mushaharka ciidanka waa la'hakin karaa ama la duwi karaa qofka qaadanaya, si waafaqsan nidaam cad oo sharci oo ah xukun maxkamadeed oo kama dambays ah.
3. Xubin kasta oo ciidanka ah oo gudanaya waajibaadkooda waa in la siiya zaad, dawooyin iyo hadba wixii la awoodo.
4. Xubin kasta oo ah ciidanka oo gudanaya waajibaadkooda waa in la siiya 30 maalmood oo fasax ah sannadkii oo lagu daray maalmaha Qaranka iyo kuwa diiniga ah ee fasaxyada dadweynaha. Fasax habboon ayaa isna la'siinayaa bukaanka iyo sababo kale oo laga garaabi karo.
5. Xubin kasta oo ciidanka ah oo gudanaya waajibaadkooda waa in la siiyo dirays ciidan, qalab ciidan oo habboon, si'ay ugu gudan karaan waajibaadkooda.
6. Gunnooyinka hawl-gallada waa in loo bixiyaa, si'loogu daboolo kharashaadkii ku baxay hawlgaladii hore ee la'amray.
7. Xubin kasta oo ciidan ah oo lagu helay fal-dembiyeed kama dambays ah oo uu ku dhacay xukun-ciqaabeed xadhig ah hal sanno iyo ka badan oo ah xukun kama dambays ah.
8. Xubin kasta oo ciidanka ah oo la'yimaadda shaqo-wanaag heer sare ah, gaar ahaan marka lagu jiro hawl-gallada la'dagaalanka masiibooyinka dabeeciga ah, waa in ay helaan abaalarinno ay ka mid yihiin:

    b. Ammaan qoraal ah (loogu qoro faylkooda shaqsi).

    t. Abaalmarin dhaqaale.

    j. Fasax dheeraad ah.

    x.Talabixn ku aaddan Guddida Dalacsiinta.

    Kh. Billad ama abaalmarin.

9. Ciidanka dabdamisku waxa ay xaq u leeyihiin qaadashada Baasaboorka shaqaalaha dawladda, si'lacag la'aan ah oo degdeg ah.
10. Ciidanku waxa ay xaq u leeyihiin in ay qaataan hub fuduud oo ka caawiya bed-qabka nafahooda iyo shaqada ay ummada u hayaanba.
11. Ciidanka Dab-demisku waxa ay xaq u leeyihiin qaadashada kaadhka muwaaddinka iyada oo aan laga qaadayn ajuurada qaadashada kaadhka.
12. Carruurta ay dhaleen xubnaha Ciidanka Dab-demiska waxbarashadooda dugsiyada hoose/dhexe iyo Sare waa lacag la'aan waxaana reebban in dugsiyada looga saaro lacag la'aan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA • FAAFINTA RASMIGA AH • SOLICITOR GENERAL OFFICE • OFFICIAL GAZETTE

13. Shakhsi kasta oo ka mid ah Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixinta oo dhaawac ka soo gaadho hawl-gallada iyo dhibaatooyinka uu ka hortagayo waxa la'siinayaa xuquuq ah daryeel caafimaad.

## Qodobka 22aad

## Xaqa hawl-gabka iyo xaqsiinta Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta

Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu waxa ay kala siman yihiin xuquuqda hawl-gabka, xaqsiinta iyo daryeelka kaleba xubnaha ciidamada qaranka, waxaana loo siinaya xuquuqdooda si' waafaqsan Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Ciidamada Qaranka Xeer L.r 88/2019.

## Qodobka 23aad

## Tababarrada Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta

1. Dhammaan dadka la'qorayaa waa in ay helaan aqoon loogu talo galay, inta aan lagu hawl-gelin waajibaadka ciidanka, haddii qofku aanu ka gudbin tababarka shaqo-bilawga/carbiska waa in ay taasi sababto in qofka laga joojiyo/saaro shaqada/adeega.
2. Dhammaan xubnaha ciidanku waa in ay helaan waxbarasho habboon iyo tababar ka anfacaya shaqooyinka.
3. Tababarka xubnaha ciidanku, si'gaar ah iyo si'guudba, waa in uu noqdaa shaqada dhammaan heerarka kala duwan ee Taliyayaasha, sidoo kale tababarka waaxaha iyo hawl-gallada dabka.
4. Xubnaha Ciidanka Dab-damisku waxa ay qaadanayaan tababarka gudaha iyo kuwa debadda.
5. Waxa waajib ah in ay xubnaha ciidanku helaan fursado waxbarasho debadeed, si' ciidanku u noqdo hay'ad ku qalabaysan aqoon casri ah.
6. Askari kasta iyo sarkaal kasta oo ka tirsan Ciidanka Dab-damiska iyo samatabixinta waxa ku waajiba in uu leeyahay/leedahay aqoon iyo tababar u dhiganta xilka uu hayo.

## Qodobka 24aad

## Qiimeynta Ciidanka

1. Xubnaha Ciidanku waa in ay helaan qiimayn sannadle ah oo ku aaddan hawl gudashadooda iyo anshaxa, taas oo loo adeegsan karo hawl-gelinta mustaqbalka, tababarrada iyo dalacsiinta.
2. Xubana ciidanku waa in ay helaan qiimayn dheeraad ah, ka dib marka ay soo qaataan koorsooyin tababar oo muhiim ah.

## Qodobka 25aad

## Shaqo ka saarista xubnaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta

Askari kasta oo ka tirsan Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta oo gala dembi oo uu ku dhaco xukun maxakamadeed oo ciqaabtiisu ka badan tahay hal sanno oo kama dambays ah oo ay ku rido Maxakamada ciidamada qaranku, waxa uu si toos ah u waayayaa xubinnimadiisa ciidan.

## Qodobka 26aad



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH SOLICITOR GENERAL OFFICE OFFICIAL GAZETTE

### Anshaxa Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta

1) Ciidanka Dab-demiska Qaranka iyo Samatabixintu, waxa uu yeelanayaa Xeer-nidaamiye anshax oo u gaar ah oo lagu faahfaahiyo hab-dhaqanka asluubeed ee looga baahan yahay xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta.

2) Xeer-nidaamiyaha anshaxa ee ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, waxa soo saaraya Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, waxaana fulinaya Taliska Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta.

### Qodobka 27aad

### Derajada Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta

1) Xubnaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu, waxa ay yeelanayaan derajo ciidan oo la' mid ah derajada Ciidanka Booliska.
2) Xubnaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu, waxa ay u kala amar qaadanayaan sida ay u kala derajo sarreeyaan.
3) Iyada oo aan waxba loo dhimmayn nuxurka faqradda 2aad ee qodobkan, haddii laba askari oo ciidanka ka wada tirsani isku derajo noqdaan, waxa ay u kala amar qaadanayaa sida ay derajada u kala hor qaateen, haddii ay isku mar qaateena sida magacoodu ugu kala horreeyo liistada.

### Qodobka 28aad

### Wada Shaqaynta Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta iyo Dawladaha Hoose ee Dalka

1) Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta oo ah ciidan u madax-bannaan shaqadiisa, haddana iyada oo aan waxba loo dhimayn adeegyada dawladaha hoose qabtaan waxa uu xarumo dab-demis ka hir-gelinayaa degmooyinka iyo magaalooyinka dalka.
2) Taliska Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu waxa uu degmooyinka dalka wada shaqayn toos ah kala yeelanayaan maamullada Goleyaasha Deegaanka ee degmooyinka iyo gobollada.
3) Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta iyo maamulada Goleyaasha Deegaanku waxa ay iska kaashanayaan hawl-gallada ka hortagga, xakamaynta dabka iyo hawl-gallada gurmadka ee masiibooyinka dabiiciga ah.
4) Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta iyo maamullada Goleyaasha Deegaanku waxa ay iska kaashan karaan sidii loo hubin lahaa ama loo baadhi lahaa in dhismayaasha cusub ee ay ka mid yihiin kuwa ganacsiga, warshadaha iyo suuqyada ganacsigu ay leeyihiin qalabkii loogu talo galay badbaadada iyo xakamaynta dabka, (fire and safety standards)
5) Maamullada Goleyaasha Deegaanka ee degmooyinka dalku waxa ay xarumaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta ee degmooyinka dalka ka taageerayaan:
    b) Helitaanka baabuurta dab-demiska iyo qalabka fudud ee dabka lagula dagaalamo.
    t) Dhismaha xarumaha iyo hoosada gaadiidka dab-demiska ee degmooyinka.
    j) Dhismaha berkadaha keydka biyaha ee xarumaha dab-demiska.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

x) Dawladda Hoose ee degmada waxa laga rabaa in ay hanato maal-gashiga iyo daadejinta kooxda Dab-demiska ee degmada.

## QAYBTA LIXAAD

## BADBAADADA

### Qodobka 29aad

### Badbaadada shacabka

1) Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu si'uu u guto waajibaadkiisa la'xidhiidha badbaadada shacabka waxa uu qaadayaa tallaabooyinkan soo socda:

    B) Waxa ay hubinayaan in goobaha ganacsiga, goobaha waxbarashada, goobaha caafimaadka, xarumaha dawladda iyo hay'adaha aan dawliga ahayn ay haystaan oo leeyihiin qalabka gacanta ee dab-demiska;

    T) Waxa ay ka caawinayaan bulshada guud ahaan rakibaadda iyo hirgalinta qalabka dab-demiska ee la'isticmaalo, si lacag la'aan ah.

2) Guud ahaanba tababarka iyo aqoonta la'xidhiidha badbaadada iyo la'dagaalanka dabka waxa bixin kara Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta Qaranka JSL oo keliya.
3) Goob kasta waxa waajib ku ah in ay Ciidanka Dab-demiska ku soo wargeliso, haddii cabudhku ka baxo haamaha dab-deminta ama cillad kale ku timaaddo.
4) Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu waxa ay samayn doonaan hubin iyo dayactir sannadle ah oo lagu samayn doono qalabka dab-deminta.
5) Inta an la'dhisin dhismeyaasha waaweyn, wershedaha, dugsiyada, cusbitaallada, hudheellada waaweyn, goleyeyaasha maddadaalada, kaalmaha shidaalka iyo meelaha ay isugu yimaddaan dad fara badani, waa in lagu soo war geliyo hawlaha guud, dawladaha hoose iyo Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta, si ay uga qayb qaataan habboonaanshaha dhiska.

### Qodobka 30aad

### Badbaadada Goobaha Ganacsiga iyo Dhismeyaasha

Si'looga hortago khatarta dabka, meheradaha ganacsiga waxa ku waajib ah:

1. In la'dhigto qalabka dab-demiska ee gacanta ee ku habboon (Proper Portable Fire Extinguishers) waana in la dhigaa meel muuqata oo laga hawl geli karo, haddii ay baahiyi timaaddo oo Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta oo keliyi u qoondeeyaan oo aan cid kale loo ogoleyn.
2. Haddii ay dhigan waayanna waxa ay mutaysanayaan ganaax lacageed oo dhan laba boqol oo kun (200,000 Shillin SL), haddiise mar labaad lagu qabto waxa la ganaaxaaya 400,000 SL oo lagu shubi doono khasnadda Dawladda dhexe, haddii mar saddexaad lagu qabto waxa laga xanibayaa sharciga uu ku shaqeysanaayo.
3. Gadiid kasta **waa in** la saaro demiyaha dabka ee ku habboon, haddii laga waayo waxa la ganaxaaya 100,000 SL, haddiise mar labaad laga waayo waxa lagu ganaaxaayaa 200,000

Shillin SL, haddiise mar saddexaad laga waayo waxa laga xanibayaa muddo sannad ah ruqsadda wadista gadiidka oo ay maxkamadda heer degmo ee dalku ka laali doonaan si'waafaqsan xeerkan iyo xeerka waddo marista Xeer L.r 56/2013.

4. In qalabka Dab-demiska ee dhismeyaasha iyo goobaha ganacsiga la'dayactiro sannadkiiba hal mar, iyada oo dayactirkooda iyo kormeeridoodaba ay samayn doonaan Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta oo keliya.
5. Dhismeyaasha iyo meheradaha waaweyni waa in ay ugu yaraan la'haadaan qalabka digniinta bixiya ee hab-gacmeedka looga shaqeysiiyo ama qalabka iskii iskaga shaqeysiiya ee qiiqa iyo dabka sheega (Smoke detectors) kuna xidhan yihiin qalabka digniinta bixiya (Fire Alarm) iyo sallaamada degdegga loogaga dego dhismaha.
6. Dhismeyaasha waaweyn, hudheelada, cusbitaalada, bakhaarrada, jaamacadaha, dugsiyada, Warshadaha, dhismeyaasha dhaadheer I.W.M, waa in ay yeeshaan albaabada degdegga looga baxo (emergency exit) oo leh calaamadaha xaaladaha degdegga ah tilmaama.
7. Ciidanka Dab-damisku waa in ay siiyaan wacyi gelin iyo tababarka aasaasiga ah shaqaalaha meheradaha, si aanay khalad u samaynin marka ay dabku inta uu bilowga yahay la'dagalamayaan.
8. Mulkiilayaasha iyo shaqaalaha meheradaha ganacsiga iyaga oo la'kaashanaya Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta waa in ay qaataan tababarka aasaasiga ah ee isticmaalka qalabka dab-demiska iyo farsamooyinka ka hortagga iyo la'dagaalanka dabka inta uu soo gaadhayo Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu. Khidmadda qofkiiba tababarkiisu waxa ay noqonaysaa 80,000 sl sh ah oo lagu shubayo khasnadda Dawladda dhexe.
9. Dhismeyaasha waaweyn ee dad fara badani ka shaqeeyaan, ama u hoydaan sida xafiisyada, meheradaha waaweyn, wershedaha, tiyaatarrada, cusbitaalada, dugsiyada, jaamacadaha, hudheelada la'seexdo I.W.M, waa in sannadkii lagu sameeyaa kormeer lagu hubsanaayo in aaney jirin khatar sababi karta in uu dab kaco (Fire Prevention Checks), wixii laga helana lagu sameeyo dayactir degdeg ah lana buuxiyo foomka tallaabadii lagu sixi lahaa (Corrective Action).
10. Dhammaan inta ku xusan faqradda lixaad waa in sannadkiiba mar loo sameeyo tijaabo sida degdegga ah ee dhismeyaasha loogaga baxo. (Fire Evacuation Drills).

## Qodobka 31aad

## Kaalmaha Shidaalka

1) Kaalmaha shiidaalka waa in ay yeeshaan qalabka gacanta ee dab-demiska oo ku filan (Portable Fire Extinguishers) sidoo kalana shaqaalaha kaalmaha shidaalka lagu tababaraa isticmaalkooda.
2) Marka haamaha Kaalmaha shiidaalka booyadahu ay shidaalku ku shubayaan waa in aanay shaqaynin makiinadaha shidaalka ee kaalintu, lana dhigo kaalinta dhinacyadeeda calaamado tilmaamaya in aanay shaqaynayn oo haamaha shidaal lagu shubayo.
3) Marka gaadiidka lagu shubayo shidaal ama ay ka qaadanayaan shidaalka kaalmaha, waxa waajib ah in la demiyo gaadhiga, waxa kale oo mamnuuc ah in sigaar lagu ag cabo kaalamaha shidaalka.
4) Goobaha ay ku yaallaan kaalmaha shidaalku waxa ka mamnuuc ah in gaadiidka la dhigto xilliyada habeenkii iyo maallintiiba ama baarkinno laga dhigto. Kaalintii lagu helana waxa lagu ganaaxayaa ganaax lacageed oo dhan 300,000 SL, sh marka labaadna waa 600,000

SL, sh ah oo lagu shubi doono khasnadda Dawladda Dhexe, mar saddexaadkana waxa laga xannibaaya ruqsadda ganacsi.

### Qodobka 32aad

### Soo Dejinta, Rakibidda Iyo Dayactirka Qalabka Dab-deminta

1) Qalab kasta oo dab-demis oo la soo dejinaayo waa in uu noqdo qalab tayadiisu fiican tahay oo waafaqsan hal-beegyada tayada qalabka dab-demiska ee la yaqaan.
2) Komishanka dhawrista tayadu si'waafaqsan Xeerka Guddida Dhawrista Tayada Xeer L.r 68/2014 waxa uu leeyahay hubinta tayada (checking) qalabka dab-demiska ee ka soo dagaya madaarrada, kastammada dhulka iyo dekadaha dalka iyaga oo u eegaya hab-raacyada caalamiga ah (inernational standards).
3) Shirkad kasta oo soo dejinaysa qalabka dab-demisku waa in ay keenaan oo laga helaa wixii qalab dayactir ah (Spare Parts).
4) Lama ogola in dalka la keeno gaadiid dab-demis oo aan tayo lahayn.
5) Ka dib marka qaybta dhismaha lagu sameeyo qiimeynta iyo nashqadaynta ay sameeyaan Wasaaradda Hawlaha Guud, Dawladda Hoose iyo Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu, dawladda hoose waxa ay bixinaysaa ogolaanshaha dhismaha.
6) Inta aan lagu rakibin wiishashaka (LIFT) ee fooqyada lagu rakibaayo waa in lala soo socodsiiyaa Ciidanka Dab-demiska iyo kuwa ay ku rakibanyihiinba, si loo sii ogaado wax ka qabadkiisa iyo xalladaha degdegga ah (EMERGENCY) ka shaqeysiintiisa haddii uu ku xidhmo dad.

## QAYBTA TODOBAAD

## BAADHITAANKA, GANAAXYADA IYO CIQAABAHA KA DHANKA AH IS-HORTAAGGA SHAQO IYO GURMADKA CIIDANKA DAB-DEMISKA IYO SAMATABIXINTA

### Qodobka 33aad

### Waddo Marista Gaadiidka Dab-demiska iyo Samatabixinta

1) Gaadiidka Dab-demiska iyo Samatabixintu marka ay waddada marayaan si' ay dhakhso ugu gaadhaan goobta dhibta dabku ka dhacday, una bixiyaan adeega dab-damiska, waxa ay samayn karaan:

    b) In ay mari karaan haad kasta oo ka mid ah waddooyinka marka ay hawl-gallada gurmadka ku jiraan si ay degdeg ugu gaadhi karaan goobta dabku ka kacay iyada oo aan loo eegaynin xeerka waddo marista gaadiidka.

    t) In ay laydhadhka hore, kuwa sare iyo qayla dhaantoodaba shitaan si ay u dareen galiyaan dadweynaha iyo gaadiidka kale ee waddooyinka ku jira.

    j) In xawaare nabadeed oo taxadir leh ku socon karaan una dhaafi karaan laydhadhka baabuurta kala haga ama ishaarooyinka, si looga hortago khasaare nafeed iyo mid hantiyeed oo ka dhalata dabka.



FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

x) In ay dhigan karaan gaadiidka dab-demiska goob kasta oo ka mamnuuc ah gaadiidka kale marka ay gurmadka ku jiraan.

2) Gaadiidka kale waxa ku waajib ah in ay mudnaanta waddada siiyaan gaadiidka ciidanka dab-demiska ee gurmadka ah, ugana baxaan waddada si'ay u dhaafaan.
3) Ciidanka nabad-gelyada waddooyinka waa in ay gaadiidka kale waddada ka joojiyaan si'ay si dhaqso ah ugu gudbaan gaadiidka Ciidanka dab-demiska iyo Samatabixintu.
4) Gaadiidka ka dhega adkaada waddo banaynta waxa la'saarayaa ganaaxyo, iyada oo loo raacayo Xeerka Waddo marista Gadiidka iyo xeerarka kale ee khuseeya.
5) Haddii uu shil ka dhex dhaco gaadiidka dab-demiska iyo gaadiid kale marka gurmadka lagu jiro, waxa la'waafajinayaa sida ay Shareecada islaamku qabto.

## Qodobka 34aad

## Is'hortaagga Gurmadka Gaadiidka Dab-demiska iyo Samatabixinta

1. Cid kasta oo is'hortaagta, hakisa ama khalkhal gelisa habsami u socodka hawsha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta marka ay ku caddaato waxa lagu ciqaabayaa xadhig dhan 1-3 sanno ama ganaax dhan 10 Milyan oo Sl sh ah iyada oo hoggaaamiyeyaasha dembiga la'saarayo ciqaab ka culus oo ah xadhig dhan 4-6 sanno iyo ganaax lacageed oo dhan 25 milyan oo sl sh ah.
2. Cidda weerar u gaysata Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta nooca uu doonaba ha noqdee; dhagax-tuur ama gacan ka hadal ama adeegsada hub kale, waxa lagu ciqaabayaa xadhig dhan 3-5 sanno iyada oo loo eegayo xaaladaha ciqaabta cusleeya isla markaana haddii ay waxyeello u gaystaan ciidankana waxa laga qaadayaa xaqa iyo magdhawga askariga uu dhaawacu gaadhay, iyada oo loo raacayo si' waafaqsan hannaanka tacsiirta ee shareecada Islaamka ee xaqista qoomaha.
3. Qof kasta oo gaadhsiiya burbur gadiidka iyo qalabka Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixinta, waxa uu mutaysanayaa xadhig ciqaabeed dhan 6 bilood ilaa sannad iyo in uu bixiyo qiimaha khasaaraha uu gaadhsiiyay gadiidka iyo qalabka Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixinta.
4. Qof kasta oo burburiya ama sifo kale oo aan loo ogalaan u adeegsada dhuumaha biyaha dabka (Fire hydrant) ee loogu talo galay in ay dab-damisku adeegsadaan, waxa lagu ciqaabayaa ganaax dhan 12 milyan oo SL SH ah, haddii uu bixin waayana waxa loogu beddelayaa xadhig u dhigma.
5. Waxaa ku waajib ah wakaalladaha biyaha ee dalku in ay sameeyaan meelo Gaadiidka Dab-demiska iyo Samatabixintu ka qaataan biyaha, marka ay ku jiraan gurmadka degdegga ah.

## Qodobka 35aad

## Yeedhmada Beenta ah ee Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta loogu Yeedho

1) Waxa dadwaynaha ka reebban in ay sameeyaan yeedhmo been ah oo si ula kac ah loogu wargeliyo Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta in uu dab kacay.
2) Iyada oo aan waxba loo dhimayn qodobka 127aad ee XCG qof kasta oo sameeya yeedhmo been ah oo uu ku soo caddibaayo Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta waxa uu galay



OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

fal-dambiyeed waxaana lagu ciqaabayaa xadhig dhan 6 bilood ilaa sannad iyo ganaax dhan 1 milyan oo sl sh ah.

3) Waxa cid kasta ka reebban in uu shido dab gaysan kara dhibaato iyado oo aan lasoo ogaysiin Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta, haddii ay dhacdana waxa lagu ganaaxaaya 170,000 SL SH oo lagu shubayaa khasnadda Dawladda Dhexe.

**Qodobka 36aad**
**Baadhista Goobaha Shilalka Dabka**

1. Ciidanka Dab-damiska iyo Samatabixintu marka uu soo gaadho goob u dab ka qarxay ama masiibo dabiici ah ka dhacday waxa uu xidhayaa goobta shilka, waxaana loo aqoonsanayaa goob shil ka dhacay, iyada oo lagu wareejinayo agagaarkaas oo dhan xadhig muujinaya in aan loo soo gudbi karin goobtaas ay baadhistu ka socoto.
2. Ciidanku natiijada badhistiisa waxa uu la wadaagayaa hay'adaha ammaanka iyo caddaaladda.
3. Ciidanku waxa uu awood u leeyahay in uu xidho qofka ku xadgudba goobta baadhistu ka socoto una gudbiyo sida ugu macquulsan saldhigga ugu dhaw.
4. Iyada oo aan waxba loo dhimayn Xeerka Guddida Korontada Qaranka iyo laanta dambi-baadhista waxa ay leeyihiin awoodda baadhista shilalka ay sababeen korontooyinka dabku iyaga oo kaashanaya Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta.

## QAYBTA SIDDEEDAAD

## QODOBBO KALA DUWAN

## HANTIDA, QALABKA IYO MIISAANIYADDA

**Qodobka 37aad**

**Hantida Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta**

1) Hantida Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu waa hanti qaran, cidina dan gaar ah uma isticmaali karto.
2) Dhammaan hantida Ciidanka Deb-damiska iyo Samatabixinta Qaranka waa in loo sameeyo diiwaan u gaar ah oo lagu diiwaan geliyo.
3) Taliyaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu waxa uu dejinayaa hab-raacyo maamul (Administrative procedures) oo si gaar ah loogu maamulo hantida Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta.

**Qodobka 38aad**

**Daryeelka Qalabka Ciidanka**

1) Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixintu waxa uu abuurayaa hoosada dayactirka gaadiidka iyo qalabka dab-demiska.



FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

2) Qalabka dab-demiska ee ay ka mid yihiin gaadiidka dab-demiska, mashiinnada iyo qalabka kale ee dabka lagu demiyo waa in si'joogta ah loo dayactiro.
3) Xubin kasta oo ka mid ah Ciidanka Dab-demiska waxa ku waajib ah ilaalinta iyo daryeelka qalabka Dab-demiska ee uu masuulka ka yahay.
4) Dayaacadda iyo tagrifalka aan daruuriga ahayn ee ku timaadda qalabka ciidanka waxa ka dhalanaysa magdhaw u dhigma dayaacadda uu sameeyay, waxaana loo raacaya qofka dhibataas qalabka u gaystay.

## Qodobka 39aad

## Miisaniyadda Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta

1) Miisaaniyadda Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta Somaliland waxa ay ka iman doontaa:
   b. Miisaaniyadda Dawladda Dhexe uga qoondeyso Miisaaniyadda Guud ee qaranka.

   t. Deeqaha iyo kabka ay ka helaan Dawladaha Hoose.

   j. Deeqaha iyo tabarucaadka ay ka helaan ganacsatada iyo qaybaha bulshada.

   x. Deeqaha ay ka helaan hay'adaha maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ah.
2) Miisaaniyadda Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta Qaranka waxa lagu maamulayaa hab waafaqsan Xeerka Maamulka Maaliyadda Xeer L.r 75/2016.
3) Taliyaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta iyo hoggaanka Maamulka iyo Maaliyaddu waxa ay masuul ka yihiin ilaalinta, kormeerka, dabagalka habsami u maamulka miisaaniyadda Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta.

## Qodobka 40aad

## RUGTA HOGGAAMINTA MASIIBOOYINKA HEER QARAN

1. Haddii ay dhacdo masiibo heer qaran ahi, waxa jiri doona si'waafaqsan xeerkan **rug** laga hoggaamiyo oo lagala socdo hawlgallada lagula tacaalayo masiibada heer qaran oo ku taalla Xarunta Dhexe ee Ciidanka Dab-demiska iyo samatabixinta (Incident Command Center ICC). Waxaana wada fadhiisan doona hay'adaha kala duwan ee ku shaqada leh sida:
   B) Madaxweynaha Taliyaha Guud ee Ciidamada Qaranka.

   T) Taliyaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta.

   J) Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

   X) Badhasaabka Gobolka.

   Kh) Maayirka Magaalada.

   D) Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka.



FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

R) Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Biyaha.

S) Taliyaha Ciidanka Booliska.

2. Madaxdu waxa ay ka caawinayaan ciidanka gurmadka hay'ad kasta shaqada ay ku leedahay xalinta masiibada heer qaran, waxaanay kala socon doonaan goobta masiibadu ka dhacday qalabka war isgaadhsiinta sida: Fogaan-aragga I.W.M

## Qodobka 41aad
## Xeer-nidaamiyeyaal

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudahu isaga oo kala tashanaya Taliyaha Ciidanka Dab-demiska iyo Samatabixinta, waxa uu soo saarayaa Xeer-nidaamiyeyaasha lagu dhaqan-gelinaayo xeerkan, kuwaas oo aan ka horimanayn xeerkan.

## Qodobka 42aad
## Tirtirid

Xeerkan waxa lagu tirtiray xeer kasta oo ka hor imanaya xeerkan.

## Qodobka 43aad
## Dhaqan-galka

Xeerkani waxa uu dhaqan-gelayaa marka ay ansixiyaan Goleyaasha Xeer-dejintu (Golaha Wakiillada iyo Golaha Guurtida) Madaxweynuhuna saxeexo, isla markaana ku soo saaro faafinta rasmiga ah, si'waafaqsan Qodobka 76aad ee Dastuurka JSL.

| | |
|---|---|
| **C/risaaq Siciid Ayaanle** | **Md. Yaasiim Maxamuud Xiir (Faratoon)** |
| **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL** | **Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL** |
| ______________________ | ______________________ |

FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE